Isticmaal Diiwaanka Laybareeriga Si Ad U Heshid Qoraallo iyo Alaab Afaf Badan Ku Qoran

KING COUNTY LIBRARY SYSTEM

Laybareeriga degmada King County waxa uu leeyahay buugaag, cajallado fiidiyow ah, muusig iyo majalado ku qoran labaatan af oo kala duwan oon ahayn Ingiriisiga. Waxad isticmaali kartaa kombiyuutarada laybareeriyadayada si ad u heshid qoraallo ku qoran afkaaga hooyo. Xiitaa haddii qoraalladu ***aanay*** oolin laybareeriga xaafadaada, waxad codsan kartaa in qoraalka ama alaabta la heli karo lagaaga soo qaado laybareeri kale oo ah KCLS oo laguugu soo diro laybareeriga xaafadaada. Waxa laguu soo diri doonaa kaadh-boosteed, fariin tilifoon ah ama ogeysiis iimayl ah marka alaabtu soo gaadho laybarareeriga xaafadaada. Waxay alaabta kuu hayn doonaan todobada cisho.

Qoraallo kala-duwan oo afafkan ku qoran ayaa laga helaa laybareeriyada degmada King County:

Arabic	***Hmong***	***Persian***	***Spanish***
Chinese	***Japanese***	***Polish***	***Tagalog***
French	***Khmer***	***Russian***	***Thai***
German	***Korean***	***Serbo-Croatian***	***Ukrainian***
Hindi	***Punjabi***	***Somali***	***Vietnamese***

1

Si ad ad u heshid qoraallo ku qoran afkaaga hooyo, tag kombiyuutarka dadweynaha ee laybareeriga xaafadaada ee ay ku qoran tahay **Library Catalog** (Diiwaanka Laybareeriga).

Haddii ad u mar uun u baahatid gargaar, waxad weydiisan kartaa shaqaale laybareeri.

2

Barta sare ee muraayadda waxad ku arki doonta xariijin buluug ah oo leh carab ay ku qoran tahay **Search** (Baadh). Kalmadda **Search** (Baadh) hoosteeda waxa ku yaalla dhawr wax oo la kala dooranayo. Guji doorashada labaad: **Advanced** (Horumarsan). Waxa kuu soo bixi doona muraayad leh tiro dheer oo ah waxyaabo la kala dooranayo, iyo sanduuqyo banaan oo ku xiga. Hoos tag ilaa **Subject/Summary Words** (Mawduuc/Kalmado Koobis ah), ka dibna sanduuqa banaan ku garaac afka ad doonaysid, oo u qoran sida uu ugu qoran yahay liiska sare. Mida kale ku garaac kalmadda ah "language". (Tusaale: "Somali language") Riix furaha **Enter** (Gali), ama guji barta **Go** (Tag) si ad u heshid liiska alaabta.

Waxad arki doontaa liis ay ku qoran yihiin dhamaan buugaagta, cajalladaha fiidiyowga, CD-yada, DVD-yada, cajalladaha iyo majaladaha u haysto laybareerigu ee ku qoran afkaa ama ku saabsan afkaa. Afafka qaarkood liiska kuu soo bixi doonaa waxa uu noqon karaa mid dheer.

Waad yarayn kartaa liiskaa haddii ad xad u yeeshid. Muraayadaada **Search** (Baadh) geeskeeda midig sare waxa ku yaalla laba sanduuq oo xad u yeelli kara liiskaaga.

3

Sanduuqa **Sort By** (Ku Shaandhee) waxa u kuu ogalaanayaa inad si nidaam ah u kala soocdid alaabta.

- **Publication date** (Taariikhda daabacaadda) waxay shaandhayn doontaa alaabta si alaabta ugu cusubi u soo hormarto kuwa ugu da'ada weyni ugu dambeeyaan.
- **Author** (Qore) waxay u shaandhayn doonta alaabta hab alifbata ama alifbeeto ah marka la eego magaca dambe ee qoraha.
- **Title** (Magac) waxay u shaandhayn doonta alaabta hab alifbata ama alifbeeto ah marka la eego magaca shayga.
- **Call #** (Wicitaan) waxay u shaandhayn doontaa alaabta isla habka tirada ama alifbeetada ah ee lagu dhigo raaraha laybareeriga.

Sanduuqa **Limit By** (Ku Xadee) waxa u kuu ogalaan doonaa inad dooratid alaab gaar ah.

- **Media** (Qaab) waxay kuu ogalaanaysaa xulasho ah qaabka, sida **Cassettes** (Cajallado) ama **DVD**.
- **Collection=Easy** (Ururo=Fudud) waxay soo xushaa alaabta ku haboon caruurta yaryar (da'da 0-8)
- **Collection=Junior** (Urur=Caruur) waxay soo xushaa alaabta ku haboon caruurta ah da'da dugsiga (da'da 8-12).
- **Owning Library** (Laybareeriga Mulkiilaha ah) waxay soo xushaa alaabta taalla laybareeri KCLS oo gaar ah.

4

Muraayadda ugu horaysa waxa lagugu tusi doonaa alaabta u dhexaysa 1 iyo 25. Laybareeriga xaafadaada ayaa iska leh alaabta magacooda ay xiddig midig kaga taallo. Dhamaan alaabta kale waxa laga helaaa laybareeriyada kale ee KCLS. Waxad isticmaali kartaa falaadhaha ku yaalla barta kor-iyo-hoos u-dhaqaajinta (waa barta cawlan ee midig ka xigta liiska) si kor iyo hoos ad u dhaqdhaqaajisid liiska alaabta. Meesha bogga ugu hoosaysa marka ad gaadhid waxad weydiisan kartaa inad aragtid tirada ku xigta ee alaabta ah haddii ad gujisid lambarka bogga soo socda.

5

Magaca alaabta ayaa liiska ugu soo horeeya. Haddii ad falaadha mawska dul-geysid magaca, waxa hoostiisa ka soo bixi doona xariijin. Guji magaca si ad u aragtid war dheeraad ah oo ku saabsan shayga.

- Qaybta cad ee boggu waxay bixisaa war guud oo ku saabsan shayga.
- Meesha hoose waxad ku arki doontaa bar buluug ah oo ay ku qoran yihiin kalmadahani **Copy/ Holding Information** (Nuqul/Warka Haynta). Tani waxay ku tusaysaa goobaha ay yaallan dhamaan nuqullada ama koobiyada shaygu. Haddii barta **Status** (Xaalad) ay sheegayso in buuggu yahay **checked in** (mid yaalla) laybareeriga xaafadaada, waxad tagi kartaa raarta si ad u soo qaadatid. Shaqaalaha laybareeriga ayaa si farxad leh kaaga gargaari doona si ad u heshid shayga.
- Haddii barta **Location** (Goobtu) sheegayso inaan laybareeriga xaafadaadu nuqul ka haysan shayga, waxad nuqul ama koobi codsan kartaa adigoo gujinaya barta ka saraysa barta buluugga ah ee la yidhaahdo **Request Item** (Codsi Shay). Waxa lagaa codsan doonaa inad garaacdid dhawr lambar.
  - **User ID** waa lambarka kaadhkaaga laybareeriga.
  - **Pin** waa lambarka aqoonsiga ee gaarka kuu ah, kaasoo badanaa ah afarta tiro ee ugu dambeeya lambarka tilifoonkaaga.
  - Imminkana guji barta la yidhaahdo **Login** (Galid).
- Waxad imminka arki doontaa muraayadda **Request Confirmation** (Codsi Xaqiijin). Waxa kale oo lagu weydiin doonaa inad dooratid goobta ad ka qaadan doontid shayga. Midigta kalmadaha **Select a location to pick up the material** (Dooro goob ad shayga ka soo qaadatid) waxa ku qoran sanduuq ay ku taxan yihiin dhamaan laybareeriyada KCLS. Laybareeriga xaafadaadu waa inu ku qoran yahay meesha ugu saraysa liiska. Haddii ad doonaysid inad dooratid laybareeri kale, guji falaadha si ad u aragtid liiska oo dhan. Dooro laybareeriga ad doonaysid adiga oo gujinaya, ka dibna guji barta **Request** (Codsi). Nuqulka ama koobiga la heli karo ee ugu soo horeeya waxa loo diri doonaa laybareeriga waana laguu sii hayn doonaa. Waxa laguu soo diri doonaa kaadhka boosta, fariin tilifoon ah ama ogeysiis iimayl ah marka alaabtu diyaar noqoto. Waxay alaabta kuu hayn doonaan todobo cisho.

6

Haddii ad laybareeriga degmada King County ad doonaysid inad baadhbaadhid adiga oo guriga jooga, waxad gali kartaa rugta internetka ee **www.kcls.org** ka dibna guji barta la yidhaahdo **Library Catalog** (Diiwaanka Laybareeriga). Ka dibna, raac isla talaabooyinka sare lagu soo sheegay.

Diiwaanka KCLS ee kombiyuutaraysan waxa loo isticmaali karaa in lagu helo wax kasta oo u laybareerigu leeyahay. Fariimahani waxa kaliya ee ay kuu sharaxayaan sida loo helo qoraallada iyo alaabta ku qoran afkaaga hooyo. Waxa loo baahnaan doonaa inad isticmaashid tabo kale si ad u heshid magacyo, qoreyaal ama mawduucyo gaar ah. Isku dayi inad tijaabisid noocyo baadhis ah oo kala-duwan ood ku samaysid diiwaanka, ama shaqaale laybareeri gargaar weydiiso, ama isa soo qor fasal ah waxbarasho kombiyuutar oo laga bixinayo laybareerigaaga. Laybareeriyada intooda badani waxay bixiyaan fasallo waxbarasho ah ugu yaraan mar bishii, laybareeriyada qaarkoodna waxay bixiyaan fasallo lagu bixiyo afaf aan ahayn Ingiriisi.

Xusuuso, haddii ad dhib kala kulantid isticmaalka diiwaanka laybareeriga, ama helista waxa ad doonaysid, ***fadlan weydiiso*** gargaar shaqaalaha laybareeriga. Waxay doonayaan in booqashada ad laybareeriga ku timid ay kuu noqoto mid guul iyo farxad kuu leh.

www.kcls.org